

# MUSQULO LOO DHANYAHAY/LOO SIMANYAHAY

## Gaar ah • Xirmaya • Ammaan ah

### SU'AALAHAD-HAD-IYO-GOOR LA'IS-WEYDIIYO

#### 1. Maxaa loo samaynayaa musqulahan loo simanyahay?

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay dib-u-cusboonaysiin ku samaynayaan dhammaan musqulaha ku yaalla iskuullada ay ka socoto dib-u-cusboonaysiin dhinaca dhismeyasha ah. Musqulahan cusub waxay noqon doonaan kuwo gaar ah, ammaan ah, oo qofku uu soo xiran karo.

Dhammaan ardayda, lab iyo deddigba way isticmaali karaan musqulahan maadaama oo musqul walba ay gaar u go'antahay leedahayna albaab u gaar ah, waxaa la wadaagayaa meelaha gacmaha lagu dhaqdo oo kaliya.

Si loo daboolo baahiyo badan oo kala duwan, Waaxda Dhismeyasha ee SPPS ayaa ka hawl-gashay dhismaha musqulahan cusub iyadoo kaashanaysa shirkad maxalli ah oo ka shaqaysa naqshadaynta dhismeyasha, Maamulka Saint Paul iyo ardayda iskuulka Johnson High.

#### 2. Sidee bay u egyihiin musqulahan loo simanyahay?

Musqulahan cusub way ka waawaynyihiin, ka quruxsanyihiin kana ammaansanyihiin kuwii hore. Musqul kasta waxay leedahay oo gaar u ah darbi iyo albaab dhulka ilaa saqafka is-haya iyo marawaxad iyo nal is-daaraya marka qofku galo musqusha. Musqul kasta waxay leedahay albaab xirmaya oo kala sheegaya in lagu *jiro* iyo inay *faaruq* tahay. Dhinaca gudaha ee albaabka musqusha wuxuu ku tusinayaa calaamad ay ku qorantahay *way-xirantahay* ama *ma-xirna*. Ma jiri doonaan musqulaha istaagga lagu isticmaalo (urinals).

#### 3. Maxay musqulahan loo simanyahay kaga duwanyihiin musqulihii hore ee caadiga ahaa??

- **Asturnaan badan:** Musqul kasta waxay leedahay albaab xirmaya oo kala sheegaya in lagu *jiro* iyo inay *faaruq* tahay. Dhinaca gudaha ee albaabka musqusha wuxuu ku tusinayaa calaamad ay ku qorantahay *way-xirantahay* ama *ma-xirna*.
- **Dhammaan ardaydu lab iyo deddigba si siman ayay u isticmaali karaan musqulaha:** ardayda oo dhan, lab iyo

deddigba way isticmaalin karaan musqulahan maadaama oo musqul walba ay gooni u go'antahay leedahayna albaab u gaar ah, waxaa la wadaagayaa meelaha gacmaha lagu dhaqdo oo kaliya. Dugsiyada dhexe iyo kuwa sare, waxaa laga yaabaa in macallimiinta iyo ardayduba isla isticmaalaan musqulaha.

- **Ma jiri doonaan musqulaha istaagga lagu isticmaalo (urinals).**

#### 4. Maxaa ka dhigaya musqulahan loo simanyahay kuwo ammaan badan?

Si sahlan ayaa loola socon karaa oo loo ilaalin karaa musqulahan cusub: Ardayda iyo shaqaalaha isticmaalaya marinada ayaa si sahlan u arki kara aagaga guud ee la wadaago ee musqulaha oo loo sameeyay si waasaca oo leh irrido waaweyn. Musquluhu waxay ku yaallaan meel cagtu ku badantahay oo mashquul ah, meelaha la wadaagayo ee gacma-dhaqashada waxaa ku xiran kamarado duubaya.

#### 5. Iskuulladee helaya musqulahan cusub? Dhismeyasha SPPS oo dhan miyay wada yeelan doonaan musqulahan cusub?

Musqulaha iskuulka Johnson High waxaa dib-u-cusboonaysiintan lagu sameeyay sanadkii 2016-17. Laga billaabo xilligan gu'ga ee 2018, Iskuullada **Adams Spanish Immersion, Highland Park Elementary, iyo St. Anthony Park** waxay yeelan doonaan musqulahan cusub.

Marka la gaaro sanadka dambe, iskuulladan soo socda iyaguna waxay yeelan doonaan musqulo cusub: **Como Park Senior High, Horace Mann, Humboldt High School iyo Linwood Monroe Arts Plus**. Iyadoo la'eegi doono sida hadba dakhli loogu helo, dhismeyasha kale ee SPPS iyaga musqulahooda waxaa lagu samayn doonaa dib-u-cusboonaysiin.

# MUSQULO LOO DHANYAHAY/LOO SIMANYAHAY

Gaar ah • Xirmaya • Ammaan ah



**XIRMAYA:**  
Albaabku wuxuu  
tusinaayaa  
**VACANT** marka  
aan musqusha  
cidina ku jirin.



**AMMAAN AH:**

Qaabka loo sameeyay ee waasaca ah ayaa  
musqulahan ka dhigaya kuwo si sahlan loo ilaalin  
karo. Meelaha la wadaagayo ee gacma-dhaqashada  
waxaa ku xiran kamarado duubaya.



**XIRMAYA:**  
Albaabku wuxuu  
tusinaayaa  
**OCCUPIED** marka  
musqusha lagu  
jiro.



**GAAR AH:**

Musqul kasta waxay leedahay oo gaar u ah darbi iyo  
albaab dhulka ilaa saqafka is-haya iyo marawaxad iyo nal  
is-daaraya marka qofku galo musqusha.